Manhajka loogu talagalay

Manhajka loogu talagalay dugsiga barbaarinta

Lpfö 18

Wareegtada (SKOLFS 2018:50) ee khuseeya manaahijta dugsiga barbaarinta

Cinwaanka dalbashada:
Norstedts Juridik kundservice 106 47
Stockholm
Taleefan: 08-598 191 90
Emayl: kundservice@nj.se www.nj.se/offentligapublikationer

ISBN: 978-913832736 4 90
Sawirro: Tobias Flygar
Garaafyada: Typoform AB Tryck:
DanagårdLitho 2018

Nuxurka

1. Qiyamka iyo hadafka dugsiga barbaarinta.....5

QIYAAMKA ASAASIGA AH.....5

ISFAHMIDA IYO DAREENKA WALAALTINIMO.....5

UJEEDADA IYO KALA DUWANAANSHAHA.....6

WAXBARASHADA LOO-WADA SIMANYAHAY..... 6

HADAFKA DUGSIGA BARBAARINTA..... 7

DARYEELKA, HORUMARKA IYO WAXBARASHADA..... 10

HORMARKA KAST EE DUGSIGABARBAARINTA..... 11

2. U jeedooyinka iyo tilmaamaha.....12

2.1 HEERARKA IYO QIYAAMKA.....12

2.2 DARYEELKA, HORUMARKA IYO WAXBARASHADA.....13

2.3 KA QAYB QAADASHADA CARRUURTA IYO SAAMAYNTA..... 16

2.4 DUGSIGA BARBAARINTA IYO QOYSKA..... 17

2.5 KALA WAREEGA IYO ISKAASHIGA.....17

2.6 DABAGALKA, QIIMEYNTA IYO HORUMARKA..... 18

2.7 MAS'UULIYADDA MACALLIMIINTA DUGSIGA BARBAARINTA EE WAXBARIDDA..19

2.8 MASUULIYADA MAAMULAHA..... 19

1. Qiyamka iyo hadafka dugsiga barbaarinta

QIYAAMKA ASAASIGA AH

Dugsiga barbaarinta waa qayb ka mid ah nidaamka dugsiga waxayna ku tiirsan yihiin aasaaska dimuqraadiyadda. Sharciga waxbarashada iswiidhishka (2010: 800) wuxuu dhigayaa in ujeedada waxbarashada dugsiga barbaarinta ay tahay in carruurtu helaan oo ay horumariyaan aqoonta iyo qiyamka. Waa inay kor u qaaddaa dhammaan horumarka iyo waxbarashada carruurta iyo sidoo kale u jee-jeeranka rabitaan waxbarasho ee noloshooda oo idil. Waxbarashadu sidoo kale waa in ay gudbisaa oo sugtaa ixtiraamka xuquuqda aadanaha iyo qiyamka aasaasiga ah ee dimoqraadiyada ee bulshada Iswiidhan ku tiirsan tahay.

Qof kasta oo ka howl gala dugsiga barbaarinta waa in uu horumariyaa ixtiraamka lama taabtaanka ah ee nolosha aadanaha, xorriyadda iyo sharafta qofka, qiimayaamka sinaanta dadka oo dhan, sinnaanta dumarka iyo ragga, gabdhaha iyo wiilasha, iyo wadajirka dadka. caruurta iyada oo lagu salaynayo jinsiyada, aqoonsiga lab ama dhedig, diintiisa ama aaminaadaha kale, naafonimadiisa, nooca galmoodka ama da'da, carruur ama qof uu ilmuhu qaraabo layahay, ama xadgudubyo kale. Dhammaan damacyada noocaas ah waa in si firfircoon looga hortago.

Waxbarashadu waa in lagu fuliyaa habab dimuqraadi ah oo waa in ay aasaas u noqotaa kordhinta xiisaha iyo mas'uuliyadda carruurta in ay si firfircoon uga qayb qaataan bulshada iyo horumarinta waarta - labadaba mid dhaqaale iyo bulsho iyo sidoo kaleba mid bii'adeed. Aragtida mustaqbalka fog iyo tan caalamiga ah labadaba waa in lagu muujiyaa waxbarashada.

Dugsiga barbaarinta waa inuu ka tarjumaa qiimayaasha iyo xuquuqaha lagu muujiyey Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta (Heshiiska Xuquuqda Caruurta). Haddaba waxbarashadu waa in lagu saleeyaa waxa loo arko in ay dani ugu jirto ubadka, in caruurtu ay xaq u leeyihiin in ay ka qayb qaataan oo ay saamayn ku yeeshaan, iyo in caruurtu ka warhayaan xuquuqdooda.

ISFAHMIDA IYO DAREENKA WALAALTINIMO

Qof kasta oo ka howl gala dugsiga barbaarinta waa in uu horumariyaa ixtiraamka qof kasta naftiisa oo uu ka shaqeeyaa horumarka waara.

Waxbarashadu waa inay siisaa carruurta fursad ay ku horumariyaan awoodooda naxariis iyo walaac dadka kale iyagoo dhiirigelinaya oo xoojinaya naxariistooda iyo u diir naxitaanka xaaladaha dadka kale. Waxbarashadu waa in lagu sifeeyaa furfurnaan iyo ixtiraamka kala duwanaanshaha aragtida iyo hab nololeedka dadka. Waa inay siisaa carruurta fursad ay kaga tarjumaan oo ay kula wadaagaan fikradooda arrimaha nolosha siyaabo kala duwan.

Caalamaynta sii kordheysa ee bulshada Iswiidhishka waxay shuruudo badan saartaa awoodda ay dadku u leeyihiin inay la noolaadaan oo ay fahmaan qiyamka ka dhex jira kala duwanaanta dhaqameed. Dugsigu waa goob kulan bulsho iyo dhaqameed oo ay tahay in kor loogu qaado fahamka carruurta ee qiiyaamka

KALA DUWANAANSHAHA. Barashada xaaladaha nololeed ee kala duwan iyo dhaqamada waxay gacan ka geysan kartaa kobcinta awoodda fahamka iyo dareenka xaaladaha iyo qiyamka dadka kale.

Waxbarashada dugsiga barbaarinta waa in ay aasaas u noqotaa fahamka carruurta ee luqadaha iyo dhaqamada kala duwan, oo ay ku jiraan luqadaha iyo dhaqamada dadka laga tirada badan yahay ee qaranka. Sharciga (2009:724) ee ku saabsan luqadaha laga tirada badan yahay ee qaranka ayaa dhigaya in qowmiyadaha laga tirada badan yahay ay yihiin Yuhuud, Roma, Sami, Finnish Iswidish iyo Tornedalians. Sami sidoo kale waa dad asal ah. Sharciga luqadda (2009:600) wuxuu dhigayaa in luqadaha laga tirada badan yahay ee qaranku ay yihiin Finnish, Yiddish, Meänkieli, Romani Chib iyo Sami.

UJEEDADA IYO KALA DUWANAANSHAHA

Dugsiga barbaarinta waa inuu ahaadaa mid u furan fikradaha kala duwan. Qof kasta oo ka howl gala dugsiga barbaarinta waa inuu isla waqtigaas ilaaliyaa qiyamka aasaasiga ah ee lagu sheegay Sharciga Waxbarashada iswiidhishka iyo manhajka oo si cad uga fogaanaya waxyaabaha ka hor imanaya qiyamkaas. Dugsiga barbaarinta waa inuu ku dhiiri galiyaa carruurta inay soo bandhigaan fikradooda iyo taladooda ayna tahay inay sameeyaan tan. Fikradaha carruurta waa in lagu tixgaliyaa waxbarashada oo waa in la siiyaa fursad ay ku sameystaan ra'yigooda oo ay ku sidaas ku sameeyaan ayagoo ku saleeynaya xaaladooda. Markay tan sameeyaan, carruurtu waxay heli karaan kalsooni xirfadahooda waxayna si firfircoon uga qayb qaadan karaan oo ay wax uga sheegi karaan waxbarashadooda.

Carruurta ku jirta dugsiga barbaarinta waa in aan lagu caburinin hal aragti oo gaar ah iyada oo aan la tixgelin aragtiyo kala duwan. Sidaa darteed, waxbarashadu waa inay noqotaa mid xaqiiqo ah, mid la taaban karo oo aan qirasho lahayn.

Habdhaqanka qof kasta oo ka howl gala dugsiga barbaarinta, iyo habka ay ugu falceliyaan ugana hadlaan wax, ayaa saameeyaa fahamka carruurta iyo ixtiraamka xuquuqda iyo waajibaadka ku habboon bulshada dimoqraadiga ah. Sidaa darteed, qof kasta oo ka howl gala dugsiga barbaarinta ayaa muhiim u ah tusaale ku dayasho leh.

WAXBARASHADA LOO-WADA SIMANYAHAY

Sida uu qabo sharciga waxbarashada, waxbarashadu waa in ay ahaato mid isku mid ah iyadoon loo eegin halka lagaga bixinaayo dalka guhiisa. Waa in ay tixgelisaa xaaladaha iyo baahiyaha kala duwan ee carruurta oo la waafajiyo dhammaan carruurta ku jirta dugsiga barbaarinta. Taas macneheedu waxa weeye in aan waxbarashada si isku mid ah meel kasta loogu samayn karin, sidaas awgeedna agabka dugsiga xannaanada aan loo qaybin si siman.

Waxbarashadu waa in ay ka bilaabataa manhajka iyo waxa ubadka xiiseeya iyo waliba waxa ay caruurtu hore u garanayeen oo ay hore u barteen. Waa in ay si joogto ah ula tacaalaan carruurta iyada oo dhiirigelinaysa daahfurka iyo aqoonta cusub. Dugsiyadu waa inay si dheeraad ah diiradda u saaraan carruurta, kuwaas oo, sababo kala duwan, u baahan hagid iyo dhiirigelin dheeraad ah ama taageero gaar ah Ilmo kastaa waa inuu helaa waxbarasho loo haabeeyey oo la isku hagaajiyey si ay uga caawiso inay koraan intii karaankooda ah. Carruurta sida ku meel gaarka ah ama si joogto ah u baahan taageero iyo dhiirigelin dheeraad ah waa in tan la siiyaa iyadoo lagu salaynayo baahiyahooda iyo xaaladahooda.

Dugsiga barbaarinta waa inuu si firfircoon oo u jeedo leh u horumariyaa xuquuqda iyo fursadaha siman ee dhammaan carruurta, iyada oo aan loo eegin jinsiga.. Dugsiyada barbaarinta ayaa mas'uul ka ah ka shaqaynta ka dhanka ah qababbka jinsiga ee xaddidi kara horumarka carruurta, xulashooyinka, iyo waxbarashada. Sida dugsiga barbaarinta uu u abaabulo waxbarashada, sida carruurta loola dhaqmo iyo waxa loo baahan yahay iyo waxa laga filayo carruurta ayaa gacan ka geysta qaabeynta aragtidooda ku saabsan waxa aytahay dheddig iyo lab. Dugsiga barbaarinta waa inuu markaa abaabulo waxbarashada si carruurtu iskula kulmaan, u ciyaaraan oo ay wax u bartaan, oo ay tijaabiyaan oo ay horumariyaan awoodooda iyo danahooda, oo leh fursado isku mid ah iyo ereyo isku mid ah, iyadoo aan loo eegin jinsi.

HADAFKA DUGSIGA BARBAARINTA

Aragtida guud ahaan

Waxbarashada dugsiga barbaarinta waa in ay soyaal u noqotaa aas-aaska waxbarashada nolosha oo idil. Waa inay ahaataa mid u leh madadaalo, nabdoon oo ahaataa waxbarasho dhamaan caruurta oo idil ah. Waxbarashu waa inay ahaataa mid ku saleeysan aragtida guud ahaan ee caruurta iyo baahiyahooda, halkaasoo daryeelida, hormarka iyo waxbarashadu ay isku dhafan yihiin sida qayb midaysan. La shaqaynta qoysaska, dugsiyada barbaarinta waa ineey kor uqaadan korriinka carruurta oo ay noqdaan shakhsiyaad firfircoon, hal abuur leh, karti leh, oo mas'uul ah oo si togan wax ugu soo kordhiya bulshada.

Waxbarashada waxaa ka mid ah baridda. Waxbariddu waxay ku lug leedahay dhiirigelinta iyo ku xujaynta carruurta ujeedooyinka manhajka oo ah bar bilow iyo jihayn, waxayna ujeedadeedu tahay horumarinta iyo waxbarashada carruurta. Waxbarashadu waa in ay ku salaysan tahay nuxuro la qorsheeyey ama ku soo ifbaxaaya isla goobtaa sababtoo ah horumarka iyo waxbarashadda carruurtu waxa ay dhacaan mar kasta. Macallimiinta dugsiga barbaarinta waa inay mas'uul ka yihiin nuxurka barbaarineed ee waxbaridda iyo shaqada ku jihaysan hadafka si kor loogu qaado horumarka iyo waxbarashada carruurta. Macallimiinta dugsiga barbaarinta ayaa sidaas darteed mas'uuliyad gaar ah ka saaran waxbarashada ay kooxda shaqadu si wadajir ah u fuliyaan. Xubnaha kale ee kooxda shaqada, sida xannaaneeyayaasha carruurta, ayaa sidoo kale door ka ciyaara waxbaridda si ay u taageeraan horumarka iyo waxbarashada carruurta.

Dugsiga barbaarinta waa inuu ahaada sooshal bulashadeed oo ah mid firfircoon oo bixiya amaan iyo sidoo kale rabitaanka iyo ka go'aanaanta waxbarashada. Caruurtu waxay abuuraan nuxur iyo macnaha ayadoo ku saleesantahay khibradeed iyo hababka ay u fikiraan. Sidaa darteed, dugsiga barbaarinta waa inay caruurta kala kulmaan is ixtiraam naftooda iyo siyaabaha gaarka ah ee ay u fekeraan iyo fahamka adduunka ku hareeraysan. Qof kasta oo ka shaqeeya dugsiga barbaarinta waa inuu siiyaa ilmo kasta shuruudo uu ku kobciyo aaminidi iyo isku kalsoonida shaqsi ahaaneed. Waa inay dhiirigeliyaan u kuur gelida, hal abuurka iyo xiisaha carruurta. Waa inay dhiirigeliyaan u kuur gelida, hal abuurka iyo xiisaha carruurta. Tani waxay khusaysaa, waxyaabo kale, daryeelka maalinlaha ah iyo arrimaha waraaqaha.

Waxbarashada dugsiga barbaarinta waa in loo qorsheeyaa loona hirgeliyaa si kor loogu qaado horumarka, caafimaadka iyo fayoowqabka carruurta. Dugsiga barbaarintu waa inuu siiyaa carruurta jawi wanaagsan iyo hawl maalmeed dheellitiran oo leh nasasho iyo waxqabadyo ku habboon baahidooda iyo muddada joogitaankooda. Deegaanku waa inuu u sahlanaadaa carruurta oo dhan oo uu ku dhiiri geliyo inay la falgalaan oo sahamiyaan adduunka dibaddiisa, iyo sidoo kale inuu taageero horumarka carruurta, waxbarashada, ciyaarta iyo awooda lahadlida.

Deegaanka dugsiga barbaarinta waa inuu bixiyaa dhammaan carruurta waxqabadyo kala duwan oo xaalado kala duwan ah. Xulashooyin badan ayaa carruurta siiya fursado badan oo ay ku ballaariyaan qaab ciyaareedkooda

iyo doorashadooda waxqabadyada. Waa muhiim in dhammaan shaqaalaha dugsiga barbaarinta ay caawiyaan carruurta, iyadoo aan loo eegin jinsigooda, inay helaan fursado badan oo ay ku bartaan oo ay ku sahamiyaan waxyaabo kala duwan. Deegaanka dugsiga barbaarinta waa in uu dhiirigeliyaa oo ku tarbiyadeeyaa carruurta si ay u ballaariyaan awoodooda iyo danahooda iyada oo aan lagu xaddidin fikradaha jinsiga.

Dugsiga barbaarinta waa inuu la shaqeeyaa waalidka si carruurta loo siiyo fursad ay u koraan sida waafaqsan xaaladahooda. Dugsiga barbaarinta waa inuu u caddeeyaa carruurta iyo mas'uuliyiinta carruurta waxa ay yihiin hadafyada waxbarashadu. Tani waxay laga maarmaan u tahay fursadda ay ku saameynayaan oo ay ku fahmaan hadafka dugsiga barbaarinta. Waa muhiim in qof kasta oo ka mid ah kooxda shaqada uu awood u yeesho inuu fahmo oo la falgalo carruurta iyo inuu abuuro xiriir isku kalsoon oo qoyska ah, si khibradda dugsiga ka hor ay u wanaagsanaato carruurta.

Ciyaartu waa aasaaska horumarka, waxbarashada iyo fayowdhowrida

Carruurta, ciyaarta lafteeda ayaa muhiim u ah. Ciyaarta, carruurtu waxay fursad u leeyihiin inay ku daydaan, ku riyoodaan oo ay ka baaraandegaan aragtiyaha Sidaani, waxay ku samayn karaan ra'yi ku saabsan naftooda iyo tan dadka kaleba. Ciyaartu waxay kicisaa mala'awaalka iyo u diirnixitaanka. Ciyaartu waxay sidoo kale tarbiyad ku noqon kartaa oo kicin kartaa xirfadaha dhaqdhaqaaqa carruurta, isgaarsiinta, iskaashiga iyo xallinta dhibaatooyinka, iyo sidoo kale awoodda ay uga fikiraan sawirada iyo calaamadaha. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in carruurta la siiyo waqti, nifaas iyo nabad si ay u hindisaan ciyaaraha, tijaabiyaan iyo khibradaha

Ciyaartu waa inay noqotaa mid udub dhexaad u ah waxbarashada. Dabciga qof kasta oo ka tirsan kooxda shaqada iyo deegaanka ee dhiiragelisa ciyaarta waxay xaqiijinayaan muhiimada ay ciyaartu u leedahay horumarka, waxbarashada iyo wanaagga carruurta.

Carruurta waa in la siiyaa fursado ay ku ciyaaraan iskood wax u bilaabay iyo ciyaarta oo uu soo bandhigay qof ka tirsan kooxda shaqada. Dhammaan carruurta waa in la siiyaa fursad ay kaga qaybgalaan ciyaaraha wadajirka ah iyadoo lagu salaynayo xaaladahooda iyo awooddooda. Marka xubin ka mid ah kooxda shaqadu ay si wax ku ool ah u fiirsato ama u kormeerto ciyaarta, ha ahaato dhinac ama si firfircoon uga qaybqaato, waxa suurtogal ah in la aqoonsado qodobada xaddidaya ciyaarta oo dabadeed la horumariyo hababka shaqada iyo jawiga dhiirigeliya ciyaarta. Joogitaanka firfircoon, waxaa suurtagal ah in la taageero xiriirka u dhexeeya carruurta iyo ka hortagga iyo maaraynta isku dhaca.

Karitaanka lahadlida iyo samaynta

Luqadda, waxbarashada iyo horumarinta aqoonsiga ayaa aad isugu dhow. Sidaa darteed dugsiga xannaanadu waa in uu xoogga saaro sidii carruurta loogu kobcin lahaa af-iswiidhishka, iyaga oo dhiirigelinaya oo ka faa'iideysanaya rabitaankooda iyo xiisaha ay u qabaan karitaanka lahadlida siyaabo kala duwan. Carruurta waa in la siiyaa jawi dhiirigelin leh halkaas oo lagu siinayo fursado ay ku horumariyaan afkooda iyagoo dhegeysanaya wax akhrinta oo kor u qaadaya kana hadlaya suugaanta iyo qoraallada kale. Waxbarashadu waa inay siisaa carruurta shuruudaha ay ku fikiri karaan, wax ku bartaan oo ay kari karaan kula hadlida duruufo kala duwan iyo ujeedooyin kala duwan. Sidaani, aasaaska ayaa loo dhigay carruurta inay ugu dambeyntii helaan aqoonta qof kasta oo bulshada ka mid ahi u baahan yahay. Awood u yeelashadalahadlida, raadinta aqoon cusub iyo wax wada qabsi waa lagama maarmaan marka la eego bulshada ku sifowday xog badan iyo isbedel joogto ah.

Carruurta ka soo jeeda beelaha laga tirada badan yahay ee qaranka, sida dadka Sami ee asaliga ah, waa inay helaan caawinaad si ay u horumariyaan xirfadahooda luqaddooda laga tirada badan yahay oo lagu dhiirigeliyo inay dhistaan aqoonsigooda dhaqan. Dugsiga barbaarinta wuxuu markaa ka qayb qaadan doonaa ilaalinta iyo horumarinta afafka iyo dhaqamada bulshada laga tirada badan yahay ee qaranka.

Carruurta dhegoolada, carruurta maqalkoodu ku adag yahay, iyo kuwa u baahan luqadda dhegoolaha sababo kale waa in lagu dhiirigeliyaa inay horumariyaan xirfadahooda luqadda luqadda dhegoolaha ee Iswidhishka.

Carrurta leh luuqadooda afka hooyo aanan ahayn tan iswidhishkaa waa in lasiiyaa fursada ay ku kobcaan labada tan Iswidhishka ah iyo mida afkooda hooyaba.

Mid ka mid ah yoolalka dugsiga barbaarinta waa in la gudbiyo oo la dhiso hidaha dhaqanka, oo ay ku jiraan qiyamka, hiddaha, taariikhda, luqadda, iyo aqoonta, jiilka ilaa jiilka xiga. Dugsiga barbaarinta sidoo kale waa inuu hubiyaa in dhaqammo kaladuwan lagu muujiyo waxbarashada.

Carruurta waa in la siiyaa waqti, jaanis iyo nabad ku abuurida mashruucooda. Waa inay fursad u helaan inay sahamiyaan, ka tarjumaan oo ay sharraxaan waxa ka dhacaaya hareerahooda. Waxbarashadu waa inay siisaa carruurta fursad ay ku kulmaan, ku muujiyaan oo ay ku-kula hadli karaan qaabab kala duwan oo muuqaal ah sida muuqaalka, qaabka, riwaayadaha, dhaqdhaqaaqa, heesta, muusikada iyo qoob ka ciyaarka. Tani waxay ka dhigan tahay in carruurtu ay helaan fursad ay ku dhistaan, qaabeeyaan, oo ay wax ku sameeyaan iyagoo isticmaalaya qalab iyo teknoolojiyad kala duwan, oo ay ku jiraan qalabka dhijitaalka ah iyo kuwa kale. Sidaani, abuuriddu waa labadaba waxa uu Ka koobanyahay iyo hab dugsiga lagu kobcinayo horumarka carruurta iyo barashada.

Waxbarashada dugsiga barbaarinta waa in ay u ogolaato caruurta in ay isticmaalaan xisaabta si ay u sahamiyaan oo ay u sharxaan dunida ay ku nool yihiin iyo si ay u xaliyaan dhibaatooyinka maalin kasta. Waxbarashadu sidoo kale waa inay carruurta siisaa xeeladaha lagu horumarinayo karti ku filan oo dhijitaal ah iyadoo la siinayo fursad ay ku horumariyaan fahamka dhijitaal karaynta ay la kulmaan nolol maalmeedka. Carruurta waa in la siiyaa fursad ay ku dhistaan hab muhiim ah oo mas'uul ka ah tignoolajiyada dhijitaalka ah, si mustaqbalka fog ay u arkaan fursadaha una fahmaan khataraha una awoodaan inay qiimeeyaan macluumaadka.

Horumar waara iyo caafimaad iyo fayoqab

Waxbarashadu waa in ay mustaqbalka ku abuurtaa aaminaad togan oo ka mid ah sifooyinkeeda. Waxbarashadu waa inay siisaa carruurta fursad ay ku helaan hab dabiici ah oo taxaddar leh deegaankooda ku xeeran iyo dabeecadda iyo bulshada. Carruurtu waa inay sidoo kale fursad u helaan inay wax ka bartaan sida go'aamada ay dadku gaaraan ay gacan uga geysan karaan gaaritaanka horumar waara ee dhinacyada dhaqaalaha, bulshada, iyo deegaanka.

Waxbarashadu waa inay isticmaashaa daneenta carruurta oo ay tarbiyeeyso ku dhiirigeliso xiisaha iyo fahamka dabeecadda, bulshada, iyo farsamada.

Carruurta waa in la siiyaa shuruudo ay ku horumariyaan awood dhaqdhaqaaq oo kala duwan iyadoo la siinayo fursad ay kaga qayb qaataan dhaqdhaqaaqyada jireed iyo inay joogaan deegaan dabiici ah oo kala duwan. Waxbarashadu waa in ay siisaa carruurta fursad ay ku dareemaan farxadda dhaqdhaqaaqa oo ay kor u qaadaan xiisaha ay u qabaan firfircoonida jir ahaaneed. Marka carruurtu si joogto ah u jimicsadaan, cunaan cunto caafimaad leh, oo ay u noolaadaan

qaab nololeed caafimaad leh, waxbarashadoodu waxay ka caawin kartaa inay bartaan sida waxyaabahani uga dhigi karaan kuwo caafimaad qaba oo ay dareemaan fiicnaan.

Waxbarashadu waa in ay siisaa ilmo kasta fursad uu ku sahamiyo, ku weydiiyo su'aalo oo uu uga hadlo dhacdooyinka iyo xiriirada ka jira dunida dibaddeeda, sidaas awgeedna ay tarbiyo ku noqdaan oo ay kiciyaan xiisaha ay u qabaan caafimaadka iyo ladnaanta iyo sidoo kale horumar waara.

DARYEELKA, HORUMARKA IYO WAXBARASHADA

Dugsiga barbaarinta waa inuu siiyaa carruurta daryeel badbaado leh oo uu door muhiim ah ka leeyahay ku biirinta aasaaska amniga carruurta iyo isku-kalsoonaanta Waxbarashadu waa in lagu sifeeyaa daryeelka ladnaanta iyo badbaadada ilmaha. Dhammaan carruurtu waa inay la kulmaan ku qanacsanaanta iyo farxadda marka ay horumar sameeynayaa, oo ay si togan wax ugu biiriyaan kooxdooda ama bulshadooda. Dugsiga barbaarinta waa inuu carruurta siiyaa fursad ay ku horumariyaan aragtida togan ee naftoodu inay yihiin kuwo wax baranaya oo halabuur leh. Sidaa darteeda, carruurtu waa in ay helaan fursada ay ku ogaan karaan oona la cajabi karaan khibradaha iyo sahminta, oona helaan, qaabeeyaan cilmiyada kala duwan iyo khibradaha kala duwan.

Dugsida barbaarinta waa inuu ku dhiirigiliyaa hormarka carruur kasta iyo waxbarashadooda. Waxabarashada waa in had iyo jeer ay ahaataa mid ku saleeysan cilmiga seeyniska ayadoo la helaayo khibradaha seeyniska ee taageeraya marka loo eego nuxur ahaanta iyo hababka shaqayntaba. Carruurta waa in la siiyaa jawi ku habboon waxbarashada, fikirka, iyo koritaanka aqoonta, iyadoo la tixgelinayo dhinacyo kala duwan sida garaadka, luqadda, anshaxa, xirfadaha la taaban karo, khibradaha dareenka, iyo bilicda. Taas macneheedu waxa weeye in qof kasta oo ka tirsan kooxda shaqadu uu ka qaybgalo doodo furan oo ku saabsan waxbarashada carruurta iyo waxa aqoontu qiimo u leedahay hadda iyo mustaqbalkaba. Dhinacyada kala duwan ee aqoontu waa bar bilow oo dabiici ah marka laga hadlayo doodaha noocan oo kale ah. Aqoontu maaha fikrad aan madmadow lahayn. Aqoontu waxay ku timaadaa noocyo kala duwan, oo ay ku jiraan xaqiiqooyin, faham, karti iyo aqoon, noocyadani waxay ku tiirsan yihiin saameyn isku yeeshada midba midka kale Shaqada dugsiga barbaarinta waa in ay diiradda saaraan bixinta nifaasyada noocyada kala duwan ee aqoonta iyo abuurista waxbarasho halkaasoo noocyadani ay isku dheeli tiran yihiin oo ay noqdaan kuwo guud. Habka shaqo ee ku jihaysan mawduuca, waxbarashada carruurtu waxay noqon kartaa mid kala duwan oo isku xiran.

Waxbarashada waa ineey isticmaashaa khibrada caruurta, baahiyahooda iyo waxyaalaha ee xiisahooda ku muujiyaan. Laakiin carruurta waa in sidoo kale si joogto ah loola tacaalaa iyada oo lagu salaynayo manhajka iyadoo lagu dhiirigelinayo inay sameeyaan daahfuryo cusub oo ay helaan aqoon cusub. Dugsiga barbaarinta waa in uu ka qaybqaataa sii wadida iyo horumarka ubadka horumarkooda iyo waxbarashadooda una diyaar garoobaan sii wadida waxbarashada.

Dugsiga barbaarinta waa inuu kiciyaa hal abuurka carruurta, daneenta iyo isku kalsoonaanta. Carruurtu waa inay helaan fursad ay ku amkaagaan oo ay u kobciyaan awooddooda ay wax ku sahmiyaan, xiriiriyaan oo ay u milicsadaan. Waxbarashada waa in ay ku dhiirigelisaa carruurta in ay hoggaanka qabtaan, mas'uul noqdaan sidoo kalenasiiso
fursadda shaqaynta si madax banaani iyo kuwa kaleba amaba intaba. Waxabarashada waa in ay dhiirigelisaa oo u tarbiyeeysaa carruuryta in ay tijaabiyaan fikrahooda iyo kuwa dadyowga kaleba, oo aayna xaliyaan dhibaatooyinka fikradahoona ay u badalaan ficil.

Kooxda carruurta iyo wada xaajoodka u dhexeeya carruurtu waa qayb muhiim ah oo firfircoon oo ka mid ah horumarka iyo waxbarashada carruurta ee dugsiga barbaarinta. Waxbariddu waa in ay ku salaysan tahay carruurtu in ay wada bartaan iyo midba midka kale iyo sidoo kale isdhexgalka dadka waaweyn iyo carruurta. Qof kastaa uu kamid yahay
kooxda shaqada waa inay fiiro gaar ah siisaa dhammaan fursadaha carruurta ee is-dhexgalka carruurta shaqsiyadeed, kooxda carruurta iyo dadka waaweyn.

Carruurta waxay wax ku bartaan ciyaarta, dhexgalka bulshada, sahaminta iyo hinidisida, laakiin sidoo kale waxay ku bartaan u fiirsasho, sheeko iyo milicsi. Barashada carruurta waxay noqon kartaa mid kala duwan oo isku xidhan marka habab waxbarid oo kala duwan la isticmaalo, bay'adu waa mid soo jiidasho leh oo fekeraysa, waxayna dhiirigelisaa ciyaarta iyo dhaqdhaqaaqa. Waxbarashada waa in ay siisaa boos loogu talagalay hindisaha, suuro galka iyo hal abuurka carruurta. Carruurtu waa inay awood u yeeshaan inay isku beddeli karaan dhaqdhaqaaqyo kala duwan inta lagu jiro maalinta, labadaba marka ay guriga joogaan iyo marka ay joogaan guriga banaankiisa iyo degaannada kala duwan.

HORMARKA KAST EE DUGSIGABARBAARINTA

Waa in la hormariyaa waxbarashada dugsiga barbaarinta sifo ay u buuxiso hadafka qaran. Waxaa mas'uuliyadaa leh maamulka sifo tani ay uu saragasho. Hogaanka maamulaha iyo macalimiinta dugsiga barbaarinta ayaa mas'uuliyad ka saarantahay in waxbarashada lagu baro sida uu waafaqsanyahay hadafka manhajka sidoo kalena in yoolka shaqaalaha ay tahay in sare loo qaado hormarka carruuta iyo waxbarashada ayaa ah waajibaadka looga baahanyahay waxbarashada sifo loo hormariyo loona joogteeyo tayo heer sare ah. Horumarka noocaas ah wuxuu u baahan yahay in madaxa iyo qof kasta oo ka tirsan kooxda shaqada ay si nidaamsan oo joogto ah u diiwaangeliyaan, dabagalaan, qiimeeyaan oo ay u falanqeeyaan natiijooyinka waxbarashada.

2. U jeedooyinka iyo tilmaamaha

Hadafyadu waxay muujinayaan jihaynta waxbarashada ee dugsiga barbaarinta iyo sidaas darteed horumarka tayada la filayo ee waxbarashada iyo sidoo kale sida ay tani uga qayb qaadanayso horumarka iyo waxbarashada ilmo kasta**.**

Tilmaamuhu waxay qeexayaan mas'uuliyadda macalinka dugsiga barbaarinta si loo hubiyo in waxbarida loo fuliyo si waafaqsan yoolalka manhajka. Xeerarka ayaa sidoo kale qeexaya shaqada qof kasta oo ka tirsan kooxda shaqada, oo laga yaabo inay ku jiraan macallimiinta dugsiyada barbaarinta, kuwa carruurta haya iyo shaqaale kale, ay siinayaan ilmo kasta daryeel ammaan ah iyo kor u qaadida dhammaan horumarka iyo waxbarashada carruurta.

Qof kasta oo ka shaqeeya dugsiga barbaarinta waa inuu raacaa heerarka iyo qiyamka u dejiyay manhajka dugsiga barbaarinta iyo ka qayb qaadashada fulinta himilada dugsiga barbaarinta.

2.1 HEERARKA IYO QIYAAMKA

Dugsiga barbaarinta waa inuu si firfircoon oo u jeedo u leh u saameeyaa oo u dhiirigeliyaa carruurta inay si tartiib tartiib ah u qaataan qiyamka guud ee bulshadeenna oo u oggolaadaan in lagu muujiyo waxqabadyo maalinle ah oo la taaban karo oo xaalado kala duwan ah.

Ujeedooyin

Dugsiga barbaarinta waa inuu siiyaa ilmo kasta fursado uu ku hormariyo

- furfurnaantiisa, ixtiraamkiisa, isku duubnidiisa iyo masuuliyadnimadiisa,
- kartinimada uu ku xisaabtamo oo uu uga damqado xaaladaha dadka kale iyo rabitaanka inuu dadka kale caawiyo,
- awood uu u yeelashada inuu wax ogaado, ka faceliyo oo uu ka dhiidhiyo dhibaatooyinka anshaxa iyo arrimaha nolosha ee nolol maalmeedka,
- ixtiraamka iyo fahamka qiyaamka ee sinaanta dhammaan dadka iyo xuquuqda aadanaha, iyo
- mas'uuliyadda sii kordheysa iyo xiisaha horumarka waara iyo ka qaybqaadashada firfircoon ee bulshada.

Tilmaamaha

Macallimiinta dugsiga barbaarinta waa in ay xil iska saaraan

- sidii carruurta baahidooda loo ixtiraami lahaa oo loo dabooli lahaa oo ay u heli lahaayeen qibradeyntaqiimahooda,
- ku dhaqmaan hab dimoqraadi ah oo ay ku shaqeeyaan halkaas oo carruurtu si firfircoonuga qaybqaataan,
- si firfircoon uga qaybqaata aragtida sinnaanta si dhammaan carruurtu ay u helaan fursado siman oo xagga aragtiyaha la ballaariyey iyo xulashooyinka iyada oo aan loo eegin jinsiga, iyo horumarinta heerarka iyo hababka shaqada
- iyo horumarinta heerarka iyo hababka shaqada iyo ka mid noqoshada kooxda carruurta.

Kooxda shaqadu waa inay

- muujiyaan ixtiraamka shaqsiga waxayna gacan ka geystaan abuurista jawi dimoqraadi ah, halkaas oo carruurtu fursad u leeyihiin inay dareemaan dareemaan lahaansho iyo horumarinta mas'uuliyadda iyo wadajirka,
- kula howl hagaalan shaqada tallaabooyin firfircoon si looga hortago takoorka iyo xadgudubka,
- si u jeedo leh oo si firfircoon uga shaqeeya sinnaanta jinsiga,
- dhiirrigelinta is dhexgalka carruurta iyo ka caawinta iyaga sidii ay uga baaraandegi lahaayeen khilaafaadka, ka qalbi fiyoow lahaayeen isfaham la'aanta, isu tanaasulka iyo is xushmeynta midba midka kale,
- fiiro gaar ah u yeeshaan isla markaana dhibaato ku keenaya dhibaatooyinka anshaxeed iyo arrimaha nolol maalmeedka,
- u soo jiid dareenka carruurta xaqiiqada ah in dadku ay yeelan karaan qiimayaal kala duwan oo xukuma aragtidooda iyo ficilkooda isla mar ahaantaana ku xira qiyamka aasaasiga ah, oo ay
- oo ay iskaashi la yeeshaan mas'uuliyiinta, oo ka wada lahadlaan xeerarka iyo qaababka dugsiga barbaarinta ee lala yeesho mas'uuliyiinta, si kor loogu qaado horumarka ilmaha qof mas'uul ah iyo xubin bulshada ka ah.

2.2 DARYEELKA, HORUMARKA IYO WAXBARASHADA

Waxbarashada dugsiga barbaarinta waa inay gacan ka geysataa cunugga kobcinta fahamka naftiisa iyo waxyaalaha ku wareegsan agagaarkiisa. Sahaminta, rabitaanka iyo ka go'anaanta ciyaarta iyo barashada waa inay noqotaa aasaaska waxbarashada. Waa in lagu sifeeyaa daryeel, korriin iyo waxbarasho oo wada samaysanaysa. Waxbarashada dugsiga barbaarinta waa in lagu saleeyaa manhajka waxbarashada iyo sidoo kale baahida carruurta, waaya-aragnimadooda iyo waxa ay xiiseeyaan. Socodka fikradaha iyo fikradaha carruurta waa in loo adeegsadaa si loo abuuro kala duwanaansho xagga waxbarashada ah.

Ujeedooyin

Dugsiga barbaarinta waa inuu siiyaa ilmo kasta fursado uu ku hormariyo

- aqoonsigooda oo ay ku dareemaan ammaan iyo sidoo kale ka warqabka xaqa ay u leeyihiin sirtooda jireed iyo mid shakhsi ahaaneed,
- madax-bannaanida iyo kalsoonida qofka kartidiisa,
- daneentiisa, hal-abuurka iyo rabitaanka inuu ciyaaro oo wax barto,
- kartidiisa uu u shaqeeyo shaqsi ahaan iyo kooxo, iskaashi, maaraynta khilaafaadka iyo fahamkiisa xuquuqaha iyo waajibaadka iyo sidoo kale in la qaadida mas'uuliyadda xeerarka wadajirka ah,
- awoodiisa dhageysiga iyo ka tarjumida aragtida dadka kale iyo sidoo kale in la muujiyo oo la qeexo aragtida qofka,
- hal abuurkiisa iyo wax suureedkiisa,
- xirfadaha dhaqdhaqaaqa, xirfadaha isuduwidda iyo muuqaalka jirka iyo fahamka sida ay muhiimka u tahay in la u daryeelo caafimaadka qofka iyo wanaaggiisa,
- kartida loo isticmaalo loona fahmo fikradaha, arko isku xirnaanta iyo ogaanshaha hababcusub oo lagu fahmo adduunka ku hareeraysan,

- awoodda wax abuuridda iyo awoodda uu ku cabbiro iyo gudbinta khibradaha, fikradaha iyo khibradda noocyada kala duwan ee tibaaxaha sida sawirka, qaabka, riwaayadaha, dhaqdhaqaaqa, heesaha, muusikada iyo qoob ka ciyaarka,
- xiisahiisa sheekooyinka, sawirrada iyo qoraallada warbaahinta kala duwan, labadaba dhijitaalka ah iyo kuwa kaleba, iyo sidoo kale awoodda ay u leeyihiin isticmaalka, tarjumidda, su'aalaha, iyo ka doodista kuwan.
- luqadda lagu hadlo iyo ereyada si qoto dheer iyo sidoo kale inuu awood u leeyahay inuu ku kala bed-bedalo erayo, ku sheekayn karo, fikrado dhiibto, waydiiyo su'aalo, la doodo iyo kala xiriiro dadka kale xaalado kala duwan iyo ujeeddooyin kala duwan,
- xiisaha luqadda qoran iyo fahamka calaamadaha iyo sida loogu isticmaalo gudbinta fariimaha,
- Aqoontooda dhaqameed iyo sidoo kale aqoonta iyo xiisaha ay u leeyihiin dhaqamada kala duwan iyo fahamka qiimaha ay ku nool yihiin bulshada dhexdeeda oo ay ku sifoobaan kala duwanaansho iyo sidoo kale xiisaha nolosha dhaqanka deegaanka,
- labada luqadood ee Iswidhishka iyo afkooda laga tirada badan yahay, haddii ilmuhu ka tirsan yahay qowmiyadda tirada yarc,
- uqadda Iswiidhishka iyo afkooda hooyo labadaba, haddii ilmuhu leeyahay af hooyo oo aan ahayn Iswidhishka,
- Luqadda dhegoolaha ee Iswidhishka, haddii ilmuhu qabo cillad maqal, uu dhegool yahay ama sababo kale dartood u baahan yahay luqadda dhegoolaha.
- awooda isticmaalka xisaabta si ay u baaraan, uga fikiraan oo ay u tijaabiyaan xalal kala duwan oo ay ku xaliyaan dhibaatooyinkooda iyo kuwa kale,cc
- fahamka goobta, wakhtiga iyo qaabka, iyo sifooyinka aasaasiga ah ee tirooyinka, qaababka, tirada, nidaamka, tirada, cabbirka iyo isbeddelka, iyo in xisaab ahaan loo sababeeyo arrintan,
- awooda kala saarida, muujinta, baarista iyo isticmaalka fikradaha xisaabta iyo xiriirka ka dhexeeya fikradaha,
- fahamka isku xirnaanta dabiiciga iyo wareegga kala duwan ee dabeeciga iyo sidoo kale sida dadka, dabiiciga, iyo bulshada ay midba midka kale u saameeyaan.
- fahamka sida xulashooyinka kala duwan ee dadku nolol maalmeedka ay gacan uga geysan karaan horumarka waara,
- fahamka sayniska dabiiciga ah, aqoonta dhirta iyo xayawaanka iyo sidoo kale hababka kiimikada fudud iyo ifafaale jirka,
- kartida wax u sahaminta, ku qeexida qaababka kala duwan ee oraahda, waydiinta su'aalo ku saabsan iyo ka hadalka sayniska iyo tignoolajiyada,
- kartida lagu ogaan karo oo lagu sahamin karo tignoolajiyada nolol maalmeedkaiyo
- awooda lagu dhisayo, abuurista iyo dhisida iyadoo la adeegsanayo farsamooyin, agab iyo qalab kala duwan.

Tilmaamaha

Macalimiinta dugsiga barbaarinta waa in ay xil iska saaraan ilmo kasta

- dareemidda in barashada waxyaabo cusub ay tahaywax lagu farxo oo macno leh,
- leh caqabado cusub oo kicinaya rabitaanka in lagu guuleysto waayo-aragnimada aqoonta cusub,
- iyagoo leh fursado ay ku horumariyaan, ku ciyaaraan, waxna ku bartaan isla markaasna lagu dhiirigeliyo inay isticmaalaan awoodooda buuxda,
- waxaa la siiyaa daryeel wanaagsan oo u dheellitiran dhaqdhaqaaqa iyo nasashada,
- oo lagu tarbiyeeyaa oo lagu dhiirigeliyaa dhaqdhaqaaqooda, bulsheed, shucuur, iyo garaadkooda,
- uu leeyahay fursadaha uu ku dhiso is aaminaada xariir iyo uuna ku dhex dareemo amaan kooxda dhexdeeda,
- tarbiyadiisa iyo ku dhiirigalinta hormarkiisa luuqadaha iyo lahadalka sidoo kale xisabaadka, cilmiga seyniska iyo tiknoolijiyada, iyo
- waxaana laga yaabaa inay u adeegsadaan aaladaha dhijitaalka ah qaab dhiiri geilinaya horumarka waxbarashada.

Kooxda shaqadu waa inay

- ka shaqeeyaan jawi wanaagsan oo la heli karo oo loogu talagalay daryeelka, ciyaarta, dhaqdhaqaaqa, horumarka iyo waxbarashada,
- ku dhiirigeliyaan oo ku tarbiyadeeyaan carruurta si ay u ballaariyaan awoodooda iyo danahooda si ka madax banaan doorashada fikradda jinsiga
- isticmaashaa aqoonta carruurta, xiisaha, rabitaanka iyo ka go'anaanta inay ciyaaraan oo wax bartaan, oo ka caawisaa inay dareemaan kalsooni badan waxay samayn karaan,
- fiiro gaar ah u yeeshaan oona siiyaan hagis iyo dhiirigilin dhamaan carruurta sidoo kale waa inay siiyaan taageero gaar ah carruurta sababaha kala duwan ugu baahan kobocooda.
- ku tarbiyadeeyaan kuna dhiirigaliyaan rabitaankooda iyo fahmid luuqada iyo lahadalka sidoo kale xisabaadka, cilmiga seyniska iyo tiknoolijiyada,
- u abuuraan fursado ay carruurtu ku kobcin karaan awooddooda xiriirka, dukemntigareeyaan iyo gudbinta waayo-aragnimada, waayo-aragnimada, fikradaha iyo talooyinka iyaga oo isticmaalaya qaabab kala duwan oo tibaaxo, labadaba ayadoo jirta qalab dijitaal ah ama ayadoo aan jirinba,
- u abuuraan fursado ay carruurtu ku fahman sida go'aankooda uu wax uga badali karo bi'aada oo ay ku biirin karaan fikradahooda hormarka waara, iyo
- u buuraan fursado ay carruurtu ku baran karaan deegaankooda dhow iyo hawlaha bulsho ee muhiimka u ah nolol maalmeedka iyo sidoo kale inay ka qayb qaataan nolol dhaqameedka deegaanka.

2.3 KA QAYB QAADASHADA CARRUURTA IYO SAAMAYNTA

Waxbarashada dugsiga barbaarinta waa inay aasaas u noqotaa carruurta si ay u fahmaan waxa dimoqraadiyadu tahay. Horumarka bulsheed ee carruurtu waxay u baahan tahay, iyadoo ku xiran awooddooda, loo oggolaado inay qaadaan mas'uuliyadda ficiladooda iyo bi'aada dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta. Carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay ka qaybgalaan oo saamayn ku yeeshaan. Baahida iyo danaha ay carruurtu laftoodu ku muujiyaan siyaabo kala duwan ku muujiyaan waa inay aasaas u noqdaan qaabeynta deegaanka iyo qorshaynta waxbarashada.

Ujeedooyin

Dugsiga barbaarinta waa inuu siiyaa ilmo kasta fursado uu ku hormariyo

- xiisaha iyo awoodda uu u soo bandhigida fikradaha iyo talooyinka si ay u saameeyaan xaaladdooda,
- awoodda ay u leeyihiin inay qaadaan mas'uuliyadda falalkooda iyo deegaanka ee dugsiga barbaarinta, iyo
- fahamka mabaadi'da dimoqraadiga ah iyo kartida iskaashi iyo go'aanno iyaga waafaqsan.

Tilmaamaha

Macalimiinta dugsiga barbaarinta waa in ay xil iska saaraan ilmo kasta

- kulahaanshaha saameyn dhab ah ee hababka shaqada iyo nuxurka.

Kooxda shaqadu waa inay

- hormariyaan awooda uu ilmaha kaga qaybqaadan karo oona uu saameyn kaga yeelano karo waxbarashada,
- xushmeyaan xuquuqda qeexitaanka fikrada ee ilma kasta ayadoo la isticmaalayo habab kala duwan oo qeexida ah iyo hubinta in ilma kasta fikirkiisa iyo taladiisa la texgaliyo oona lagu qeexo waxbarashada.
- kordhiyaan awooda in ilma kasta uu qaato mas'uuliyada naftooda iyo kamid ahaanshaha koooxda carruurta,
- Hubiyaan in dhammaan carruurtu ay saameyn siman ku leeyihiin waxbarashada iyada oo aan loo eegin jinsiga, iyo
- u diyaarinta carruurta ka qaybgalka iyo mas'uuliyadda iyo xuquuqda iyo waajibaadka khuseeya bulsho dimuqraadi ah.

2.4 DUGSIGA BARBAARINTA IYO QOYSKA

Si loo abuuro fursada ugu wanaagsan ee suurtogalka ah ee carruurta si ay ugu suurta gasho inay u koraan si hodan ah oo kala duwan, dugsiga barbaarinta waa inuu si dhow oo kalsooni leh ula shaqeeyaa qoyska.

Tilmaamaha

Macallimiinta dugsiga barbaarinta waa in ay xil iska saaraan

- horimarinta nuxurka wadahadalka, iyaga oo hubinaya in naqshadeynta iyo hirgelinta ay waafaqsan yihiin yoolalka qaranka, iyo
- siiynta mas'uuliyiinta fursada ay kaga qaybqaataan qiimeynta waxbarashada.

Kooxda shaqada waa inay

- qaadaan mas'uuliyada hormarinta xariir aamin ah ee ka dhaxeeya dugsiga barbaarinta iyo qoyska,
- cadeeyaan hadafka iyo nuxurka waxbarasheed sifo loogu abuuro xaalado ay carruurtu iyo mas'uuliyiinta ay u helaan fursado ay ku saameyn karaan,
- la yeeshaan wada hadal joogto ah mas'uulka ilmaha oo hadalkaasoo ah wanaagga ubadka, hormarkiisa iyo waxbarashada oona sii wadaan wadahalka horumarka, iyo
- la socodsiiyaan xaaladaha gaarka ah ee carruurta iyada oo la ixtiraamayo oona la dhexgelin sirta carruurta.

2.5 KALA WAREEGA IYO ISKAASHIGA

Dugsiga barbaarinta waa inuu iskaashi la yeeshaa hab aamin ah oo leh fasalka dugsiga barbaarinta, dugsiga iyo xarunta dugsiga ka dib si loo taageero horumarka carruurta iyo barashada aragti fog. Inta aan kalawareega dhicin ka hor, dugsiga iyo xarunta dugsiga kadib waa in ay is weydaarsadaan aqoonta, khibradda, iyo macluumaadka ku saabsan nuxurka waxbarashada si loo abuuro xaalad, sii socosho iyo horumar xagga horumarka iyo waxbarashada carruurta. Sidoo kale waa inay jiraan qaabab iskaashi oo loogu talagalay diyaarinta carruurta iyo mas'uuliyiintooda ee ka gudbida dugsiga barbaarinta ilaa ugudbidda fasalka dugsiga barbaarinta, dugsiga iyo daryeelka dugsiga ka dib.

Tilmaamaha

Macallimiinta dugsiga barbaarinta waa in ay xil iska saaraan

- iyadoo lala kaashanayo macallimiinta dugsiga barbaarinta iyo macallimiinta fasalka dugsiga barbaarinta, dugsiga iyo xarunta dugsiga kadib ay is weydaarsadaan aqoonta, khibradda, iyo macluumaadka ku saabsan nuxurka waxbarashada si loo abuuro xaalad, sii socosho iyo horumar xagga horumarka iyo waxbarashada carruurta, iyo
- inta lagu jiro u wareegida in looyeesho fiiro gaar carruurta u baahan taageerada ee hormarkooda.

Kooxda shaqada waa inay

- iyada oo la kaashanaysa macallimiinta dugsiyada barbaarinta iyo macallimiinta fasallada xannaanada, dugsiga iyo xarunta dugsiga kadib, u diyaariyaan carruurta iyo mas'uuliyiintooda kalawareega.

2.6 DABAGALKA, QIIMEYNTA IYO HORUMARKA

Qof kasta oo ka mid ah kooxda shaqada waa inuu, ku saleysan yahay doorarkooda, oo lagu bixiyo waxbarashada iyada oo la raacayo yoolalka qaranka oo la baaro waxa loo baahan yahay in la qaado si loo waanajiyo tababarka oo loo kordhiyo fulinta himilooyinka.

Si carruurta loogu taageero loogana tarbiyeeyo waxbarashadooda, waxaa loo baahan yahay aqoon ku saabsan khibraddiisa, aqoontiisa, iyo ka qaybgalka ilma kasta, iyo sidoo kale saamaynta iyo xiisaha meelaha kala duwan ee bartilmaameedka ah. Aqoonta ayaa sidoo kale looga baahan yahay sida sahaminta carruurta, su'aalaha, khibradda iyo ka go'naanta ayaa loo adeegsadaa waxqabadka, sida aqoontoodu isu beddesho iyo markay u dareemaan waxqabadka mid xiiso leh, madadaalo iyo macno leh.

Ujeedada qiimayntu waa in la helo aqoon ku saabsan sida tayada dugsiga barbaarinta, sida abaabulka, nuxurka iyo hirgelinta hawsha loo horumarin karo si ilmo kasta loo siiyo shuruudaha ugu wanaagsan ee suurtogalka ah ee koritaanka iyo waxbarashada. Ugu dambeyntiina waxay ku saabsan tahay horumarinta geedi socodyo shaqo oo wanaagsan, in la qiimeeyo haddii shaqada loo fuliyo si waafaqsan himilooyinka iyo baarista tallaabooyinka loo baahan yahay in la qaado si loo wanaajiyo fursadaha carruurta ay ciyaaraan, bartaan, horumariyaan, dareemaan amaan oo ku nashaadaan dugsiga barbaarinta. Waa falanqaynta natiijooyinka qiimeynta ee tilmaamaya meelaha lagama maarmaanka u ah horumarka. Dhammaan noocyada qiimeynta waa inay ku saleysan yihiin aragtida ilmaha ee cad. Carruurta iyo waalidiintu waa inay si firfircoon uga qayb qaataan qiimaynta, ra'yigoodana waa in muhiimad la siiyaa.

Tilmaamaha

Macallimiinta dugsiga barbaarinta waa in ay xil iska saaraan

- hormarka iyo waxbarashada ilma kasta si joogto ah oo habaysan loola socdo, loo diiwaangesho oo loo qiimeeyo si ay u suurtowdo in la qiimeeyo sida dugsiga barbaarintu u habeeyo fursadaha ubadka si ay u horumariyaan oo ay wax u bartaan sida waafaqsan yoolalka manhajka,
- dukumiintiyada, kormeerka, qiimeynta iyo falanqaynta oo ay ku jiraan sida yoolalka manhajka midba midka kale isugu dhafan yahay oo ay guud ahaan u sameeyaan waxbarashada,
- dib u eegista si weyn loo eego in hababka qiimeynta ee la adeegsaday ay ku saleysan yihiin qiyamka iyo ujeeddooyinka salka ku haya manhajka,
- natiijooyinka dabagalka iyo qiimeynta si nidaamsan oo isdaba joog ah oo ay u falanqeeyaa iyada oo ujeedadu tahay horumarinta tayada dugsiga barbaarinta sidaas darteedna fursadaha carruurta ee daryeelka iyo sidoo kale xaaladaha horumarka iyo waxbarashada, iyo
- falanqayntana waxaa loo isticmaalaa in lagu qaado tillaabooyin lagu horumarinayo waxbarashada.

Kooxda shaqada waa inay

- si joogto ah oo nidaamsan ula socdaan, dukumiinti gareeyaan oo qiimeeyaan horumarka cunug kasta iyo barashada si ay ugu suurta gasho in la raaco xirfadaha isbeddelka carruurta iyo in la qiimeeyo sida dugsiga barbaarinta uu ula jaan qaadayo fursadaha carruurta ee horumarinta iyo barashada, iyadoo la raacayo ujeeddooyinka manhajka,
- la socdaan oo qiimeeyaan sida carruurtu u helaan fursad ay ku saameeyaan waxbarashada iyo sida waxbarashadu u adeegsato baahiyaha carruurta, danaha, aragtida iyo fikradaha,

- la socdaan oo qiimeeyaan fursadaha mas'uuliyiinta ee saameynta, iyo
- qiimeynta natiijooyinka kormeerka iyo qiimeynada iyada oo ujeedadu tahay horumarinta tayada dugsiga barbaarinta sidaas darteedna fursadaha carruurta ee daryeelka iyo sidoo kale shuruudaha horumarka iyo waxbarashada

2.7 MAS'UULIYADDA MACALLIMIINTA DUGSIGA BARBAARINTA EE WAXBARIDDA

Waxbaridda dugsiga barbaarinta waa inay ku baxdaa iyada oo la raacayo hagida macallimiinta dugsiga barbaarinta oo ayna salka ku heysaa horumarka carruurta iyo barashada iyada oo loo marayo helitaanka iyo horumarinta aqoonta iyo qiyamka Macallimiinta dugsiga barbaarinta waa inay hogaamiyaan geedi socodka hagitaanka hadafka iyo in waxbarida ay mas'uul ka tahay

- hubinta in daryeelka, horumarka iyo barashadaguud ahaan,
- qorshaynta iyo hirgelinta ay ku salaysantahay manhajka iyo aqoonta iyo khibradda ay carruurtu hore u heleen,
- iyadoo si dabiici ah u soo bixineysa howlaha iyo danaha carruurta, howlaha maalinlaha ah iyo howlaha joogtada ah ee dugsiga barbaarinta oo qayb ka ah barida, iyo
- horumarinta nuxurada waxbarashada iyo jawi dhiirrigeliya horumarka iyo waxbarashada taasina waxay tarbiyeenyesaa oo dhiirigalineysaa danaha carruurta iyo xiisaha iyo sii haynta dareenkooda.

2.8 MASUULIYADA MAAMULAHA

Maadaama uu yahay hoggaamiyaha waxbarashada iyo madaxa macallimiinta, xannaaneeyayaasha iyo shaqaalaha kale ee qaybta dugsiga barbaarinta, maamulaha dugsiga ayaa guud ahaan mas'uul ka ah hubinta in waxbarashada guud ahaan ay ku jihaysan tahay ujeedooyinka qaranka. Maamulaha dugsiga ayaa mas'uul ka ah tayada dugsiga barbaarinta, sidaas darteed, iyada oo la raacayo qaab dhismeedyada, waxay leedahay mas'uuliyad gaar ah si

- loo qorsheeyo, loo kormeero, loo qiimeeyo oo loo horumariyo tababarka si nidaamsan oo joogto ah, sidaas darteedna looga shaqeeyo kordhinta yoolalka,
- loo fuliyo shaqada tayada habaysan ee ka qaybgalka Macalimiinta dugsiga barbaarinta, shaqaalaha xanaanada carruurta iyo shaqaalaha kale iyo in la hubiyo in mas'uuliyiinta carruurta la siiyo fursad ay kaga qayb qaataan shaqada tayada leh,
- ay kamid tahay shaqada sinaanta jinsiga ee shaqada tayada habaysan,
- la hubiyo in shaqada dugsiga barbaarinta ay la socoto tillaabooyin taagan oo ka dhanka ah takoorka iyo xadgudubka in la fuliyo oo si joogto ah loo diiwaangeliyo,
- la hubiyo in macalimiinta dugsiga ka hor la siiyo shuruudo ay masuul kaga yihiin waxbarida,
- la hubiyo in ilmo kasta iyo mas'uulka waheliyo ay helaan hordhac wanaagsan ee dugsiga barbaarinta,
- la hubiyo in hababka shaqada ee dugsiga barbaarinta loo horumariyo si looga faa'iidiyo saamaynta carruurta,
- la hubiyo in jawi wanaagsan oo la heli karo loo qaabeeyey, iyadoo loo heli karo labadaba, qalab waxbarasho oo dhijitaal ah iyo kuwa kale,
- la ubiyo in waxbarashada loo qaabeeyo si carruurta u baahan taageerada gaarka ah ee horumarkooda ay u helaan taageerada iyo caqabadaha ay u baahi qabaan,

- la qaabeeyo waxbarashada lana waafajiyo qaybinta ilaha si dhammaan carruurtu u helaan taageerada iyo caqabadaha ay u baahi qabaan ee horumarka iyo waxbarashada,
- la hubiyo in qaabab wadashaqayn lala yeesho fasalka dugsiga barbaarinta, dugsiga iyo xarunta dugsiga kadib si loo taageero horumarka iyo waxbarashada carruurta.
- la hubiyo in wadashaqayn lala yeesho fasalka dugsiga barbaarinta, dugsiga iyo xarunta dugsiga ka dib si loo abuuro shuruudo la isku raacsan yahay iyo iskaashi la aamini karo.
- la horumariyo qaababka wada shaqayneed ee ka dhexeeya dugsiga barbaarinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah oo lala socodsiiyo himilooyinka dugsiga barbaarinta iyo habka shaqada, iyo
- in la hubiyo in macalimiinta dugsiyada barbaarinta, kuwa carruurta xanaaneeya iyo shaqaalaha kaleba ay helaan koboca xirfadaha looga baahan yahay si ay u gutaan hawshooda si xirfadaysan oo si joogto ah loo siiyo fursado ay ku wadaagaan aqoontooda iyo inay midba midka kale wax ku bartaan si loo horumariyo waxbarashada.

Manhajka dugsiga barbaarinta wuxuu ka kooban yahay labo qeybood waxaana go'aan ka gaaraya dowladda. Qaybta hore waa *qiyamka iyo himilada dugsiga barbaarinta* qaybta labaadna waa *yoolalka iyo tilmaamaha*. Si loo fahmo hadafka waxbarashada, waxaa muhiim ah in la akhriyo labada qaybood ee manhajka guud ahaan.

Skolverket

www.skolverket.se

ISBN: 978-913832736-4